



Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Ref: 434/3/B-10/18: الرقم

Mogadishu, 7th January 2018 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Hantidhowraha Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka.

Ujeeddo: Ansixinta Saddex Wasiir

M.ne Madaxweyne;

Waxaan halkan kuugu soo lifaaqay Qaraar Golaha Shacbiga Lam. GSH/B-10/014/18 ee 7^{da} Janaayo 2018 kuna saabsan Ansixinta Saddex;

1. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Guddaha, Federaalka iyo Dib u Heshiisiinta
2. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga
3. Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshada

si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka, Waxaan M.ne Madaxweynaha JFS kaa codsaneynaa in uu go'aankan ku meelmariso Xeer-Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85aad ee Dastuurka.

Naga guddoon sahan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

Tell: +252 612224442/+252 615577472

E-mail: speaker@parliament.gov.so

Website: www.parliament.gov.so

MJ/SMA



JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

QARAAR KU SAABSAN

ANSIXINTA SADDEX WASIIR

**Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha
M.ne Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye)**

Iyo

**Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka
iyo Dib-u-heshiisiinta
M.ne Cabdi Maxamed Sabriye**

Iyo

**Wasiirka Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga
Caalamiga
Danjire Axmed Ciise Cawad**

Muqdisho, 7^{da} Janaayo 2018

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

- Guddiga Joogtada -

Markuu Arkey: Qodobka 90 (c), 97(3), 98(2) iyo Qodobka 100 (b) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya;

Markuu Arkey: Warqadda Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Lam. XRW/050/01/2018 ee 03/01/2018, XRW/051/01/2018 ee 03/01/2018, iyo XRW/052/01/2018 ee 03/01/2018 kuna saabsan Magacaabid Wasiiro cusub loo magacaabay Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta iyo Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga;

Markuu Arkey: Warqadda R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya Lam. XRW/0015/01/2018 ee 03/01/2018 kuna saabsan Dhaarin Wasiirro cusub;

Saa Daraadeed: Kulankii 6-aad aan caadiga ahayn ee 7^{da} Janaayo 2018 Guddiga Joogtada Golaha Shacabka ku yeesheen Muqdisho, Xarunta Guddoonka iyo Guddiyada Golaha Shacabka Soomaaliya, waxay guddoomiyeen Qodobbada soo socda:

Qodobka 1aad:


Wuxuu wadar-oggol ku ansixiyey in Sadaxda Wasiir cusub halka hoose ku xusan loo dhaariyo xilka loo magacaabay oo mid walba ku hor qoran,

1. **M.ne Xildhibaan Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye) - Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha;**
2. **M.ne Cabdi Maxamed Sabriye - Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta; iyo**
3. **M.ne Axmed Ciise Cawad - Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga.**



Qodobka 2aad:

Qaraarkan wuxuu dhaqangalaya ka dib markii uu Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku meelmariyo Xeer-Madaxweyne, si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka looguna soo Faafinta Rasmiga ee Jumhuuriyadda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85aad ee Dastuurka.



M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

